

WAA MAXAY XAALAD DEGDEG AH OO BARAF?

Xeerarka baarkinka ee gaarka ah ayaa dhaqangalaya marka xaalad degdeg ah oo baraf lagu dhawaqaqo si loogu oggolaado in dhammaan waddooyinka Saint Paul loogu xaaqo dhinaca wadad. Magaaladu ma xaaqdo luuqyada.

Dhammaan dadka deggan iyo booddayaashu waa inay baabuurtooda ka kaxeyyaan waddooyinka magaalada sida waafaqsan xeerarka baarkinka ee xaaladda degdegga ah ee barafka.

Baaburta aan la dhigin baarkin sida waafaqsan xeerarka xaaladda deg -degga ah ee barafka waxaa loo jari doonaa tigidh oo waa la jiidi doonaa ilaa 96 saacadood kadib marka xaalad degdeg ah oo baraf ahi dhaqan gasho.

Mar walba raac dhammaan calaamadaha la dhajiyay. Ha dhigin baaburta calaamadaha ay ku qoran yihii "Maleh Baarkin."

GOORMAY TAHAY IN LA SHAACIYO XAALAD DEGDEG AH OO BARAF?

Hawlah Guud ee Saint Paul waxay ku dhawaqaan xaalad degdeg ah oo baraf ah ugu dambayn 3 -da galabnimo si loo siiyo waqtii ay degganayaasha iyo booddayaasha ku dhaqaajiyaan baabuurtooda.

Arrimo badan ayaa la tixgeliyaah kahor inta aysan Magaalada Saint Paul ku dhawaqaqin xaalad degdeg ah oo baraf, sida hawada iyo heerkulka waddooyinka, saadaasha cimilada mustaqbalka, nooca roobka, iyo uruurinta. Magaaladu waxay inta badan ku dhawaqaqdaa xaaladaha deg -degga ah ee barafka kadib marka barafku da'o 3 inji ama ka badan.

651-266-9700
STPAUL.GOV/SNOW

HEL DIGNIINAHA XAALADA DEGDEGGA AH EE BARAFKA!



Wac 651-266-PLOW (7569) si aad u heshid farrii degdeg ah oo baraf ah



Booqo
stpaul.gov/snow



Booqo stpaul.gov/snow si aad u aragto khariidada meesha aad dhiganayo si aad uga fogato tigidh ama jiidid



Iska diiwaangeli onlayn halkan stpaul.gov/snow si aad u hesho digniino iimay*



U dir farriin qoraal ah "St Paul Snow" 468311 si aad u hesho digniino qoraal ah*



Naga soo raac @stpaulpublicw iyo [FB.com/CityofSaintPaul](https://www.FB.com/CityofSaintPaul)

*Waxaa lagu heli karaa Isbaanish, Hmong, iyo Soomaali

SU'AALO?

Wixii ah macluumaadka xaaladda degdegga ah ee barafka oo ku qoran luqado kale, booqo stpaul.gov/snowlanguages ama wac 651-266-6100.

¿Preguntas? Para obtener información en español sobre la emergencia por nieve, visite stpaul.gov/snowlanguages o llame a 651-266-6100.

Lus noog? Xav paub cov xov xwm kub ceev txog daus hauv lus Hmoob, thov mus xyuas stpaul.gov/snowlanguages 651-266-6100.

Waxaa lagu daabacay warqadda 100% dib loo warshadayn karo isticmaalka kadib.



BUUG -YARAHA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BARAFKA

 SAINT PAUL
PUBLIC WORKS

651-266-9700
STPAUL.GOV/SNOW

XEERARKA XAAQIDA EE HABEENKII 9-KA HABEENIMO - 7-DA SUBAXNIMO



Saint Paul waxay xaaqdaa in ka badan 1,800 mayl layn 24 -kii saac ee ugu horreeyey xaaladda degdegga ah ee barafka. Taasi waa masaafo la mid ah u safriidda Saint Paul ilaa Anaheim, CA!

Xaaladaha degdegga ah ee barafka waxaa la iclaamiyyaa 3 -da galabnimo wuxuuna dhaqangalayaa 9 -ka fiidnimo. Kadib marka xaaladda deg-degga ah ee barafku dhaqangasho, tigidh jaridda iyo baabuur jiidistu waxay dhacayaan wadar ahaan 96 saacadood oo ah xaaqid iyo dedaallo nadiifin.

Baabuurtu waxay dhigan karaan waddada marka lagu xaaqo dhinaca wadada.

ISTICMAAL KHARIIDADA BAARKINKA EE XAALADA DEGDEGGA AH EE BARAFKA EE SAINT PAUL

Baro goorta iyo meesha aad dhigan karto baabuurkaaga marka ay jirto xaalad degdeg ah oo baraf.



Isdiiwaangeli si aad u hesho qoraal ama digniino iimayl.



Si fudud uga tilmaamso goobtaada khariidada.



Ugu keydo khariidada astaanah shaashadda aaladaada.

Ka booqo stpaul.gov/snow wixii khariidad iyo digniino ah.

XEERARKA XAAQIDA EE MAALINTII 8-DA SUBAXNIMO - 5-TA GALABNIMO



Xeerarka baarkinka ee Xaaqida Maalintii ee xaaladda degdegga ah ee barafka waxay bilaabmayaan 9-ka habeenimo xaalad degdeg ah oo baraf ah ayaa lagu dhawaaqi doonaa, oo sii socon doontaa ilaa dhammaan Waddooyinka Xaaqitaanka Habeenki loo leexin doono dhinaca wadada. Badhtamaha badhtamaha oo dhan waa Dariiq Xaaqitaan Habeenki.

**Waddooyinka La Xaaqayo
Habeenki, marka laga reebo
badhtamaha magaalada, waxaa
lagu calaamadeeyay astaamo
ah "Dariiq Xaaqitaan Habeenki"
ama "Dariiq Xaaqitaan Habeenki
Dhinaca Wadadan."**



Ha dhigin baabuurta dhinacyada waddooyinka ay ku qoran yihii calaamadahan illaa dhinaca dariiqaas laga xaaqay.

Baabuurta waxaa loo jari karaa tikidh oo la jiidi karaa ilaa 96 saacadood kadib markay xaalad degdeg ah oo baraf ah la dhaqaneliyo haddii aan la dhaqaajin inta lagu jiro Xaaqitaanka Dariiqyada ee Habeenki iyo Maalintii, ama la dhigto meelo aan la xaaqin.



HADDII BAABUURKAAGA LA JIIDO INTA LAGU JIRO XAALADDA DEGDEGGA AH EE BARAFKA:

- 1 Booqo stpaul.gov/impound si aad u hesho macluumaa dheeraad ah.
- 2 Wac lambarka la wareegidda Magaalada si aad u ogato midka haysta gaarigaaga kahor inta aadan aadin meesha:
 - 1129 Cathlin Street – 651-603-6895
 - 830 Barge Channel Road – 651-266-5642
- 3 Soo qaado furayaashaada, bixinta habboon, iyo dukumiintiyada loo baahan yahay: liisanka baabuurka oo sax ah, caddaynta caymiska, iyo caddaynta lahaanshaha (lahaanshaha).

SIDEEN U SOO SHEEGAA BAABUUR U BAAHAN IN LA JIIDO?

Inta lagu jiro shaacinta xaaladda degdegga ah ee barafka, ka wac xafiiska tigidh jaridda Howlaha Guud ee Saint Paul lambarkan 651-266-9800, taabo ikhtiyaarka 2aad, si aad u soo sheegto baabur aan dhaqaaqin iyo/ama u baahan tigidh jarid iyo jiid.

Kaddib xaaladda degdegga ah ee barafka ee ah 96-saac, haddii baaburku weli u baahan yahay tigidh jarid iyo jiidis, ka wac Booliska Fulinta Baarkinka ee Saint Paul lambarkan 651-291-1111.